

## Qoysaska Qaaligee Dugsiyada Dadweynaha Portland

Waxa aynu aragnay dhacdooyin tiro badan oo hadalo naceyb huwani in dhawrkii bilood ee u dambeeyey guud ahaan wadankeena dhammaantiis iyo dugsiyadeenaba uu ka jiray, balse si xoogan loo dareemayo inay soo kordheen maalintii arbacadii ee aan soo dhaafnay. Waxa aynu ognahay qoysaskeena iyo ardeydeenuba in dareenkoodu yahay mid ayna ku faraxsaneyn, sidoo kalena ay dareemayaa ammaan daro sidaas darreed; waa in aynu si wada jir ah u abuurno bulsho is daryeesha isla markaana soo dhaweysa dhammaan ardeydeena oo dhan. Waxa aad ogaataan in Dugsiyada Dadweynaha Portland inay ka go'an tahay inuu ahaanayo mid sugo nabadgelyada ardey kasta, taageero, ka dibna qeyb ka ahaado dugsiyadeena.

Siyaasada Golaha Waxbarashadu waxa ay luqad cad ku sheegeysaa in aan loo dulqaadan karin nooc kasta oo midab-takoor ama cago-jugleyn qofeed ama kooxeed kaasi oo ku salaysan aqoonsigooda. Dhaqanka noocaas ah qof kasta oo ka mid ah dugsiyadeena oo ku kaca waxa laga qaadayaa tallaabo degdeg ah oo ku haboon. Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay ka kooban yihiin arday kala jinsi duwan iyo gole ardeydeed oo qurux badan. Kala gedisnaantaasi waa ta Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) ka dhigtay mid wanaagsan oo xoogan. Dugsiyada degmadeenu waxa ay sii wadi doonaan sidii loo ilaali lahaa inay noqdaan kuwa nabadgelyadoodu sugan tahay ah, oo dhammaan jawiga ardaydu yahay mid ay wadagaan lana sii wadi doona taageerada iyo sidii la isku garab istaagi lahaa dhamman ardeydeena iyo qoysaskeena waqtigani.

Waxaan idinku dhiirigelineynaa fadlan inaad kala hadasho ardeydiina sidii ay qeyb uga noqon lahaayeen ardeyda fasaladooda. Ama, haddii ardeygaagu, shaqaalahaagu ama qoysaskiinu arkaan ama maqlaan hadal kasta oo naceyb(cunsuri) ah, ama ay soo waajahdo nooc ka mid ah cago-jugleyn, dirir gacan ka hadal, ama cabsi-gelin, fadlan waxaad ku dhiirigelisaa inay u sheegaan qof weyn ama gargaar weydiistaan maamulka dugsiyada, ama haddii ay suurtagal tahayba ay wargeliyaan ciidamada nabadgelyada ee booliiska. Taageeradaada Dugsiyada Dadweynaha Portland wax ay tusaale u noqon doontaa wada jirka iyo kala duwanaanshaha waqtiyadani adag.

Waad mahadsan tihiin